# Habka Diiwan gelinta Elektaroonigga ah Ee Gudiga sare ee Hay’adda Xiriirka Shaqaalaha ee Qaranka

## HABKA DIIWAANGELINTA EE NLRB

Hay’adda Xiriirka Shaqaaalaha ee Qaranka waxa ay si aad ugu dhiirigelineysaa dhinacyada kala duwan in ay adeegsadaan habka diiwaangelinta elektarooniga ah ee hay’adda si ay u soo gudbiyaan qoraalada habdhaqabka aan sharciga waafaqsaneyn ee shalaaha lagula kaco iyo daacwadaha ka wakiil noqoshada ee Xafiiska Xoghaynta guud., Qeybta Qaaliyada, Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Racfaan ka Qaadsahada, iyo Xafiis Goboleedka, Xafiis Hoos yimaada Xafiis Goboleedyada, iyo Xafiisyada Degaanka.

Habkan Elektarooniga ah weli looma adeegsan karo in lagu soo gudbin karo diiwaan gelinta dacwadaha ama codsiyada lagu abuurayo dhageysiga dacwadaha ee hay’adda. Hase yeeshee, nidaamkani waxa uu soo gudbinta wixii intaa ka soo hara ka dhigayaa mid fudud kana tayo wanaagsan. Sidaa darteed waa mid dadajinaya habka shaqada.

National Labor Relations Board
1099 14th Street , NW
Washington, D.C 20570
www.nlrb.gov

## SIDEE QORAALADA LOOGU DIRAA KOMBIYUUTARKA (E-FILE)

Si aad qoraalada ugu soo dirto NLRB hab elektaroonik ah, waxa aad tagaysaa barta internetka ee hay'adda oo ah www.nlrb.gov. Waxa aad halkaas ka heli kartaa sida qoraalada loogu soo diro hab elektaroonik ah adiga oo adeegsanaya kombiyuutarka kana doonaraya cinwaanka "E-Gov", ka dibna ka sii dooranaya mid ka mid ah "My NLRB" ama "E-Filing" dhinaca hoose ee shaxda soo laalaada marka la doorto.

Haddii aad horey uiga diiwaan gashaneyd "My NLRB," waxa aad ku geli kartaa adiga oo isticmaalaya magacii aad ku furatay iyo erayga sirta ah  Waxa aad qoraalada si elektaroonig ah ugu soo gudbin kartaa adiga oo magacaaga ku gala ama aan is diiwaan gelin, laakiin waxa aad laguugu dhiiri gelinayaa in aad is diiwaan geliso iyada oo is diiwaan gelintu ay dedejineyso diiwaan gelinta qoraalada waayo halka lagaala soo xiriiryo wax ay ku cadahay diiwaangelinta. Is diiwaan gelintu waxa kale oo ay kuu ogolaaneysaa inaad wax ka bedeli karto macluumaadka halka lagaala soo xiriirayo inta dacwadu ay xafiiska ka furan tahay, waxaadna ogolaan kartaa in go'aanka gudiga sare iyo ALJ  laguugu diro si elektaroonik ah.

Waxa aad elektaroonig ku soo diridda qoraalka ka bilaabaysaa adiga oo ugu horeysiinaya lambarka dacwadda ka dibna dooranaya in "baarista dacwadda"  ka dib marka uu kombiyuutarku soo helo dacwadda, waxa aad is fudud u raaceysaa dariiqada uu kuu sheego ee ku saabsan sida dacwada loo diiwaangelinayo.

## FAA"IIDADA DIIWAANGELINTA DACWADA EE KOMBIYUUTARKA

Adiga oo markiiba xaqiijin ka helayo hay'adda marka aad dacwadda ku soo dirto habka kombiyuutarka, waxaa markiiba kuu soo baxay bog caddeynaya dacwadaadii na soo gaartay oo aad daabacan karto si aad u kaydsato. Bogaas xaqiijinta ah waxaa ku qoran lambar caddeynaya in qoraalka dacwaddu na soo gaarey.

### Taariikhda oo Dib Loo Dhigo

Faa'iido kale oo la taaban karo oo qoraalka si elektaroonik ah lagu soo gudbiyo ay leedahay waa taariikhda soo gudbinta qoraalada oo dib loo dhigi karo. Xilliga ugu dambeeya ee qoraalka la soo gudbin karo waa 11 :59 habeenimo ee xilliga degaanka xafiisku ku yaal maalinta loo qabtay in la soo gudbiyo. Taariikhda ugu dambeysa ee la soo gudbin karo marka gacanta laga soo gudbinayo waa xilliga ugu dambeeya ee "la xirayo" xafiiska qoraalka loo soo gudbinayo taariikhda horey loo qabtay.

### Is Diiwaangelinta Adeegga Elektaroonigga ah

Marka aad iska diiwaangeliso "My NLRB," waxa aad sidoo kale iska diiwaan gelin kartaa adeegga elektaroonigga ah ee helitaanka go'aanka Gudiga sare iyo ALJ. Dhinacyada iska diiwaangeliya adeegga "Eservice" waxaa markiiba ay helaan go'aanka ay gaareen Gudiga sare iyo ALJ halkii ay sugi lahaayeen inta boostada looga soo diro. Iimaylka loo diro waxaa ku lifaaan xiriir gaarsiinaya kaydka go'aanka  oo ay ka heli karaan barta internetka. Go'aanka ay gaareen Gudiga sare iyo ALJ waxay dadweynuhu ka akhrisan barta internetka maalinta xigta ,marka lagu soo bandhigo barta internetka ee hay'adda. Waxaa intaa dheer, in dhinacyada iska diiwaan geliya adeegga "Eservice" ay Gudiga sare ka heli karaan wargelin dhinaca iimaylka oo la xiriirta mar kasta qoraalo cusub dacwada lagu daro ama laga diiwaan geliyo xafiiskooda . Xubnaha iska diiwan geliyey adeeggan waxaa loo soo diro doonaa warbixino la xiriira haddii uu jiro isbedel

ku yimaada nidaamka iyo xeerarka ay hay’addu ku shaqeyso  oo laga yaabo in ay xiise u leeyihiin dadka ka qeyb qaadanaya dacwadaha ka furan xafiiska. Si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah oo ku soo “Eserviceka” soo booqo barta internetka ee http://mynlrb.nlrb.gov

QORAALADA SI ELEKTAROONIG AH LOO DIIWAAN GELIN KARAA?

Qoraalada intooda badan waa loo diiwaan gelin karaa habka elektaroonigga:

- Jawaab ka bixinta cabashooyinka/ u hogaansanaanta waxyaabo gaar ah
- Diiwaan gelinta Racfaanka
- Soo koobitaanka Amicus ama Jawaab ka bixinta soo gaabinta Amicus, Warbixnta kooban ee dhageysiga ka hor,
- Warbixin kooban oo lagu taageerayo codsi la soo gudbiyey
- Ka tanaasulid dan ka lahaansho
- Codsiga EAJA
- Cadeymaha
- Shaxda soo bandhigidda
- Ka reebitaanka ama Su’aalo ka weydiinta waxyaabo laga reebay
- Lifaaqyada
- Sii dheereynta waqtiga la codsaday
- Heshiis si Rasmi ah loo wada gaarey
- Qoraal
- Codsi, Diidmo Codsi, iyo jawaab ka bixinta codsi diidmo.
- Codsi lagu fulinayo doorasho
- Ogeysiis maxkamad uga Yeeris ah
- Diidmo lagu Diidayo Doorashada
- Codsi lagu hor istaagayo maxkamad uga yeeris ama jawaab ka bixin
- Caddeynta Mowqifka
- Codsi Dib U eegis iyo Ka Hor istaag Codsi Dib U Eegis
- Codsi Ogolaansho Gaar Ah oo racfaan Ka Qaadasaho
- Codsi Sii wadid oo ku jeeda Doorashada
- Su’aal Weydiin
- Heshiis Soo Af Jarid
- Gaarsiin Qoraal
- Ka noqosho Codsi

QORAALADA AAN SI ELEKTAROONIG AH LOO DIIWAAN GELIN KARIN?

Qoraalada hoos ku xusan si elektaroonig ah loogama diiwan gelin karo hay’adda:

- eedeymaha la xiriira habdhaqanka aan sharciga waafaqsaneyn
- Codsiyada ka wakiil noqoshada
- Codsiga Ra’yiga talo bixiyayaasha
- Qoraal xajamigiisu ka weyn yahay labaatan (20) meegabaayt

TALAABOOYINKA LA QAADO SI AAD ELEKTAROONIK U DIIWAANGELISO

1. Booqo www.nlrb.gov
2. Ku aadi “E-GOV” kana door “E-Filing”
3. Raac tilmaamah ku qoran shaashada